

Ku soo dhawoow Mashruuceena



Co-funded by the
Erasmus+ Programme
of the European Union



Jun, 2025

PURSUE



Ku soo dhawoow Masruuceena

Waxaa aynu ka shaqeynaa kobcinta farsamooyinka dhismaha guryaha waara oo la awoodi karo qiimo ahaan, iyadoo la adeegsanayo agab deegaanka u wanaagsan oo si dabiici ah loo heli karo. Hadafkayagu waa in aan awood siino bulshooyinka ku nool Afrika gaar ahaan kuwa Saxaraha ka hooseysa, annagoo horumarinayna xalal dhisme oo hal-abuur leh, deegaanka u fiican, isla markaana jaban.

PURSUE

PURSUE waxa ay dhisaysaa wadiiqo lagu gaari karo horumar waara oo ku saabsan guryaha, waxbarashada, iyo warshadaha maxalliga ah, iyadoo loo marayo iskaashi caalami ah oo u dhexeeya jaamacadaha, khubarada, iyo daneeyayaasha ka kala socda Turkiga, Portugal, Mozambique, Tanzania, iyo Soomaaliya. Booqo website-keenna si aad u ogaato ujeedooyinkeenna, hawlaheenna, bahwadaagteenna, iyo sida aan uga qeyb qaadanayno mustaqbal adkaysi leh oo loo dhan yahay.

Bahwadaagta mashruuca PURSUE waxay qabatay kulan fogaan arag ah oo diiradda lagu saaray Cutub shaqeedka 2-aad – Hirgalin Manhaj, taas oo calaamad u ahayd tallaabo muhiim ah oo lagu mideynayo nuxurka koorsooyinka iyo hawlo tacliimeed ee jaamacadaha iskaashanaya. Kulanka waxaa ka soo qaybgalay wakiillo ka socda dhammaan jaamacadaha bahwadaagta ah, oo ay ka mid yihiin Jaamacadda Sakarya (Turkey), Jaamacadda Porto (Portugal), Jaamacadda Eduardo Mondlane (Mozambique), Machadka Tignoolajiyada Dar es Salaam (Tanzania), Jaamacadda Ardhi (Tanzania), Jaamacadda SIMAD (Somalia), iyo Jaamacadda Muqdisho (Somalia).

Ku soo dhawoow Mashruuceena



Co-funded by the
Erasmus+ Programme
of the European Union



Jun, 2025

PURSUE



Mashruuca PURSUE Xirmo shaqeedka 2-aad - Diyaarinta Manhajka

OUjeeddooyinka Kulanka

Kulanka dib u eegista Xirmada Shaqo 2aad ka wuxuu diiradda saarayay qiimeynta horumarka guud, dhammeystirka modullada ku saabsan farsamooyinka dhismaha waara, iyo dejinta jadwalka horumarinta nuxurka koorsada oo ay ku jiraan agabka tababarka, bug gacmeedyada shaybaarka iyo cutubyada. Waxaa kullanka hoggaaminayay Jaamacadda Porto oo ah madaxa Xirmada Shaqo 2aad ka waxa ayna soo bandhigtay qaab-dhismeedka manhajka iyo modullada la soo jeediyay, iyadoo dooduhu xooga saareen isku xirka ujeeddooyinka mashruuca PURSUE, ka faa'iidsiga jawaab-celintii Tanzania, iyo u qoondeynta jaamacadaha iskaashanaya hawlaha abuurista iyo dib-u-eegista nuxurka.

Caqabadaha iyo Tallaabooyinka Xiga

Hubinta isku dheelitirnaanta jaamacadaha kala heerarka ah waxbarashada, ku darista tababarro wax ku ool ah oo loo isticmaalo agabyo dhismo oo gudaha la heli karo, iyo dejinta qorshe kormeer iyo qiimeyn ayaa udub dhexaad u ah horumarinta koorsooyinka Xirmada Shaqo 2aad ka. Iskaashatadu Marshruucaan waxay ku heshiiyeen kulamo toddobaadle ah si loo hubiyo isku dubarid joogto ah iyo dib-eegis wadajir ah. Hawaashani waxay qayb muhiim ah ka tahay himilada mashruuca PURSUE ee lagu xoojinayo awoodda waxbarasho ee dowladaha ka hooseeyo Saxaraha Afrika, iyadoo koorsooyinka loo diyaarin doono kaalin waxbarasho oo furan, si loo ballaariyo ka faaiideysigiisa iyo loo abuuro sameyn togan.

Lambarka Mashruuca: 101179647 - ERASMUS-EDU-2024-CBHE-STRAND-2

Kama dhigan soo saarida jaraaidkani in gudiga taageerida midowga yurub in uu wada rumeysanyahay wax ku qoran guud ahaantiis balse waxa kaliye ee laga dheehan karo waa aragtida qoraaga. Gudigana kama ahan masul adeegsigawax ku qoran jaraaidkan gudahiisa. Taageerada Guddiga Yurub ee soo saarista daabacaddan ma aha mid ka tarjumeysa ansixinta nuxurka ku jira, oo